DEPARTMENT OF EDUCATION

# 2020–21 Liiska Tababarka Ilaalinta Imtixaanka iyo Damaanada Ilaalinta Imtixaanka iyo Asturnaanta

Shuruudaha amniga imtixaanka ee lagu sharaxay Tababarka Amniga Imtixaanka iyo Hubinta Nabadgalyada Imtixaanka iyo Bixinta Muujinta ayaa khuseeya dhammaan maamullada ACCESS iyo Alternate ACCESS ee ELLs; shaqsi ahaan MCAs (khadka tooska ah iyo waraaqaha); iyo MTAS. In kasta oo shaqaalaha ku lugta leh maamullada fog ee MCA-yada khadka tooska ah laga filayo inay raacaan wixii tallaabooyin amni ee imtixaanka ku habboon ah ee xaalad imtixaan fog ah, MDE waxay qireysaa in shuruudaha qaarkood ee ku jira Tababarka Amniga Imtixaanka iyo Hubinta Amniga Imtixaanka iyo Shaacinta aan la fulin karin ama lagu hayn karin isku si. MDE waxay wali ubaahantahay dhamaan shaqaalihii ku lug lahaa waxkasta oo imtixaan ah inay dhameystiraan liiskan hubinta iyo Hubinta, iyo hagitaan dheeri ah oo kusaabsan siyaasadaha iyo habraaca maamulka fog.

MDE waxay ubaahantahay qofkasta oo ku lug leh waxkasta oo tijaabinta ah — xitaa hadii ay furayaashooda leeyihiin meesha alaabta imtixaanka lagu hayo - inay dib u eegis ku samayso macluumaadkan si ay u yeeshaan faham aasaasi ah amniga imtixaanka si looga fogaado xadgudubyada amniga ee ula kaca ah.

Calaamadee kadib markaad dhameysid mawduuca kasta. Marka calaamadeynta aad dhameysid, akhri oo saxiix *Damaanad qaadka Imtaxaanka Ilaalinta iyo Qarinta.* U celi labadaba liiska iyo damaanad qaadkaba degmadaada ama Xidhiidhiyaha Qiimeynta Dugsiga.

## LIISKA TABABARKA IMTIXAANKA ILAALINTA

### Waa Maxay Imtaxaanka Ilaalintu?

☐ Heshiisyada maalin kasta, imtaxaanka ilaalintu wuxuu ku lug leeyahay ficillada la qaado si loo hubiyo in dhammaan waxa ku jira imtixaanka iyo jawaaabaha ardeyga la ilaaliyey si dhibcaha imtaxaanku sax u ahaadaan. Markaynu ka hadalno ‘’dhibco imtaxaan saxa’’ ama ‘’ilaalinta sharafta dhibcaha imtaxaanka,’’ tani macnaheedu tahay in natiijooyinku sax yihiin oo macno ku fadhiyaan.

### Maxaa Loo Tixgaliyaa Aamin?

☐ Dhammaan waxyaabaha ku jira imtaxaanka, qalabka imtaxaanka, iyo jawaabaha ardeyga waxaa loo tixgaliyaa aamin.

Waxyabaaha ku jira imtixaanka waxa ka mida dhamaan qeybaha imtixaanka, akhrinta qeybaha, iyo mala awaalka sayniska. Waxyaabaha ku jira imtaxaanka iyo jawaabaha ardeygu waxay noqon doonaan labadaba onlaayn iyo warqada qalabka imtaxaanka, waxa sidoo kalena lagu qori karaa qalabka aan ka ahayn ka ardeyga, sida warqada xariiqyada leh iyo tigidhka ardeyga ee imtixaanka.

## Waa Maxay Muhiimada Imtaxaanka Ilaalintu?

*Bixinta Fursmad loo wada siman yahay*

- Imtixaanka ilaalintu waa in la ilaaliyaa si loo siiyo fursad isku mida dhamaan ardeyda si loo muujiyo waxay barteen oo loo hubiyo in dhibcaha imtixaankoodu sax yihiin.

*Hubinta Natiijooyin Saxa*

- Ardeyda, qoysaska, iyo dhamaan dadka wax bartay waxay isticmaal dhico imtaxaan oo saxa hal xog ahaan si loo qiimeeyo sida wanaagsan ee ardeydu u baraneyso nidaamyada. Shaqaalaha degmada iyo iskuulkuba waxay u isticmaalayaan natiijooyinkan qeyb ka mida qiimeynta waxtarka manhajka iskuulka iyo nidaamka wax dhigista.

*Ilaalinta Maal-gashiga*

- Sidoo kale, Shaqo badan ayey dad badan ku qaadataa mudo dheer, ilaa saddex sanno, in la horumariyo imtaxaan nidaamsan. Aqoonyahanada waxbarasho, oo ay ku jiraan macallimiintu, way wada shaqeeyaan si ay u horumariyaan su'aalaha imtaxaanka. Hadii ay jiraan sharci jabin imtixaanka waxyaabaha ku jira ah, in loo isticmaalo waxyaabaha ku jira imtaxaankasta, iyo mararka qaar, inuu saameeyo in dhibcaha imtaxaanku sax yihiin.

## Cawaaqibta Jabinta Shuruucda Imtaxaanka Ilaalada

- Hadii aan imtaxaank gobolka oo dhan si wanaagsan loo ilaalin, hal ardey ama ardey badan ayaa wax yeeleyay. Hadii aan la raacin shuruucda iyo siyaasadaha loo baahan yahay oo jabinta shuruucda ilaalintu dhacdo, imtaxaanada ardeygu waxay noqon karaan qaar aan sax ahayn shaqaaluhana waxay u baahan doonaan tababaro dheeriya ama tallaabooyin dhaqan amarka degmada.

## Maxay Muhiim U Tahay Tababarka Ilaalinta Imtaxaanka?

- Sharci jabinta imtaxaanka ilaaladu meel kasta ayuu ka dhici karaa, wakhti kasta. Fahmida imtaxaanka ilaalada iyo garashada nooca sharci jabinta ilaalintu waxay caawin kartaa ka hortaga jabinta shuruucda ilaalada.

  Feejignaanatani waxa keena tababarka, oo ay ku jiraan liisak tababarka, iyo tababo kale oo looga baahan yahay doorka imtaxaankan.

## Damaanada Imtaxaanka Ilaalada iyo Qarsoodiga

- Marka laga yimaado tababar, waxaa lagaaga baahan yahay inaad dhameytirtid sanad walba.

  Waxa muhiima in aad fahantid waxaad ogolaaneysid adigoo dhameystiraya damaanadan. Marka xiga, waxaanu dib u eegi doonaa macluumaadka ku jira damaanadan iyo mas'uuliyadaada ilaalinta imtaxaanka amaankisa. Waxaad dhameystiri doontaa damaanada sanadkan ka dib liiskan.

## Raacista Shuruucda Ilaalinta Xogta Waxbarasho

- ☐ Iyadoo ay ku xidhan tahay doorkaaga, waxaad arki kartaa xogta ardeyga ee tigidhka imtaxaanka ama natiijooyinka imtaxaanka. Xogta dhamaan ardeyda waxa si adag u maamula dawlada dhexe iyo shuruucda gobolka. Door kasta oo aad ku leedahay imtaxaanka, waa inaad raacdaa siyaasadaha degmadaada ee isticmaalka xogta ardeyga iyo natiijooyinka oo xaalad asturan ah.

## Reebista Ka qeyb-galka Imtaxaaka

- ☐ Iyadoo ardeyda iyo waalidiintu go'aansan karaan in ardeydu aaney ka qeyb galin imtaxaanka, ogow in niyad jabinta ardeyda ama waalikooda eey qeyb galku saameyn xun ku leenahay karo iskuulka ama degmada.

## Raacista Siyaadaha iyo Nidaamyada Imtixaanka Ilaalada

- ☐ Waxaa laagaga baahan yahay inaad raacdid dhamaan siyaasadaha iyo nidaamyada imtixaanke ee gobolka, degmada iyo iskuulka. Intaasi waxaa dheer, waa inaanad ka dhaadhicin ama ku dhiiri galin dadka kale jabinta siyaasadaha ama nidaamyada ama in ay qaadaan talaabooyin khatar galin kara ilaalinta imtixaanka.

## Ilaalinta Waxyaabaha ku jira Imtixaanka Ilaalada

*Xadidista Helitaanka*

- ☐ Hubi inaanad helayn ama arkayn qalabka ama waxyaabaha amaanka ah ee imtixaanka, ama inaad kuwa kale u ogaalaatid, markaan laagaga baahneyn doorka imtixaanka. ''Halista Galitaanku'' waxay noqon kartaa kaliya haysashada furayaasha qololka ama meelaha loo isticmaalo in lagu kaydiyo qalabka amaanka ah ama helitaanka onlaayn ah oo xogta imtixaanka ah.

*Raadraaca Qalabka*

- ☐ Hadii aad la tacaaleysid qalab amaan ah, hubi inaad garaneysid qorshaha ilaalinta raadraaca qalabka iyo ilaalinta, meelaha la xidhay halkaasi oo lagu kaydin doono markaan la isticmaaleyn.

*Diyaarinta Imtixaanka*

- ☐ Ma isticmaali kartid imtixaanka saxda ah ee ardeyga si aad ugu diyaarisid imtixaanka. Isticmaal khayraadka ay bixisay MDE si aad u diyaarisid tiknoolajiyada maamulka imtixaanka.

*Bixinta Macluumaadka*

- ☐ Ma qaban kartid, sawiri kartid, la wadaagi kartid ama qeybin kartid wayaabaha ku jira imtixaanka xaalad kasta ka hor, inta lagu jiro, ama kadib imtixaanka. Xataa xaaladaha loo baahan yahay in xogta lagu wada xidhiidho (sida marka arin tiknoolajiyadeed jir), waxyaabaha imtaxaanka saxda ah laguma sharrixi karo ama qaban karo sawir. Kaliya lambarka ardeyga iyo xogta ayaa la bixin doonaa.

*Waligaa Ha haysan Qalabka*

- ☐ Ka dib imtixaanka, hubi inaanad haysan qalabka waxyaabaha amaanka ah eek u jira imtixaanka, oo ay ka mid yihiin warqada xariiqyada leh.

*La hadlista ardeyda*

- Xataa marka imtixaanku dhammaado, waxyaabaha ku jira imtixaanku waa in la ilaaliyaa. Ardayda looma oggola in ay wax kaaga sheegaan ama kaala hadlaan waxyaabaha ku jiray imtaxaanka markuu dhamaado. Ma weydiin kartid ardeyda su'aalo gaara ama waxyaabaha ku jira imtaxaanka.

*La hadalka Shaqaalaha*

- Intaasi waxa dheer, laguuma oggola inaad kala doodad waxyaabaha ku jira imtaxaanka ama ashyaada, xubnaha kale ee shaqaalaha ama kooxda shirka. Adigoo dhameystiraya damaanadan, waxaad oggolaatay inaad ilaalisid qarsoonaanta waxyaabaha ku jira imtaxaanka ee aad ogaan kartid.

## Ilaalita Sharafta Natiijada Imtaxaanka

Qodobadan soo socda ee Damaanadu waa kuwo qabanaya shaqalaha ku jira qolka inta lagu jiro maamulka ku lug leh maamulka imtixaanka.

*Waligaa ha bixin faaido cadaalad daro ah*

- Macno ma leh doorkaaga maamulka, waa inaad hubisaa in dhamaan ardeyda la siiyey fursada ay si madax banaan ku muujinayaan waxay garanayaan. Hadii aad ku jirtid qolka inta ardeydu qaadaneyso imtixaanka, hubi inaad fahansan tahay waxa la ogol yahay dhanka caawinta ama ka jawaabista su'aalaha si aanu imtixaanka ardeygu u noqon mid aan sax ahayn.

*Marka walba isticmaal Najiitada Rasmiga ah*

- Dib u eegista iyo sixista jawaabaha ardeyga ee adiga lama ogola. Imtaxaanada waxa saxaya adeeg bixiye, xogtan tayada ardeyduna waxas diyaar u tahay degmooyinka iyo iskuulada iyado la marayo arbixinaha uu bixiyey adeeg bixiyuhu ama MDE imtaxaanka ka dib.

*Waligaa ha badalin Jawabaaha Ardeyga*

- Badelista jawaabaha ardeygu waa sharci jabin waxaana ka dhalan kara sixis la'aanta imtaxaanka iyo talaabo dhaqan oo suurto gal ah.

## Soo warita Maamul-xumada ama Jabinta shuruucda Ilaalinta

- Iskuduwaha qiimeeynta ee degmadaadu wuxuu kusoo ogeysiin doonaa sida loo soo gudbiyo arinkasta oo soo baxda inta lagu jiro imtaxaanka. Hadii aad aragtid am aka war heshid ardey ama talaabo shaqaale oo jabineysa ilaalinta imtaxaanka, waa masuuliyadaada inaad kala hadashid Iskuduwaha degmada ama iskuulka ama qof kale oo maamula. Xataa hadii sharci jabintu u muuqato mid aan ku talo gal ahayn, waxaa muhiima in xaalada lasoo sheego si siyaasaha iyo nidaamyada loo cadeyn karo oo loo cusbooneysiin karo si qof walbaaba u fahmo sida loo ilaaliyo imtaxaanka.

  Inkastoo aanu ku talineyno inaad ka shaqeysid gudaha degmadaada si aad usoo sheegtid arintakasta oo suurto gal ah, waxa jiri karta xaalado aad u baahan tahay inaad toos ugusoo sheegtid MDE. Shabakada MDE waxay leedahay laayn talooyina halkaasi oo walaacyada  ilaalinta imtaxaanku si qorsoodiya loogu soo warin karo.

## LA shaqeynta MDE

- ☐ Ugu danbeyntii, MDE waxay masuul ka tahay in ay dusha kala socoto dhamaan imtixaanaadka gobolka. Ka qeyb ahaan doorkaaga imtaxanka, waxaad ka qeyb gali kartaa ilaalinta goobaha ama dabo galista, ama waxa lagu weydiisan karaa bixinta xog la xidhiidha jabinta shariyada, iyo inaad ogolaatay la shaqeynta markaad sexeexdid damaanada. Hadii MDE ay sameyso booqo goob iskuulkaaga ah, waxaad raaci doontaa nidaamkaaga caadiga ah ee imtixaanka.

## Soo koobista

- ☐ La xidhiidh Iskuduwaha degmadaada ama iskuulkaaga hadii aad ka qabtid wax su'aalo ah imtaxaanka gobolka.

| | |
|---|---|
| Saxiixa | Taariikhda |
| Magaca (daabacan) | Degmada/Dugsiga |

# HUBINTA AMAANKA TIJAABADA IYO SIRTA

Shuruudaha amniga imtixaanka ee lagu sharaxay Tababarka Amniga Imtixaanka iyo Hubinta Nabadgalyada Imtixaanka iyo Bixinta Muujinta ayaa khuseeya dhammaan maamullada ACCESS iyo Alternate ACCESS ee ELLs; shaqsi ahaan MCAs (khadka tooska ah iyo waraaqaha); iyo MTAS. In kasta oo shaqaalaha ku lugta leh maamullada fog ee MCA-yada khadka tooska ah laga filayo inay raacaan wixii tallaabooyin amni ee imtixaanka ku habboon ah ee xaalad imtixaan fog ah, MDE waxay qireysaa in shuruudaha qaarkood ee ku jira Tababarka Amniga Imtixaanka iyo Hubinta Amniga Imtixaanka iyo Shaacinta aan la fulin karin ama lagu hayn karin isku si. MDE waxay wali ubaahantahay dhamaan shaqaalihii ku lug lahaa waxkasta oo imtixaan ah inay dhameystiraan liiskan hubinta iyo Hubinta, iyo hagitaan dheeri ah oo kusaabsan siyaasadaha iyo habraaca maamulka fog.

**Wuxu shaqaynayaa sanad dugsiyeedka 2020–21**

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) waxa uu sharciga qaranku uga baahan yahay inay rakibto barnaamijyo tijaabin ah oo wadanka oo dhan ah. Tijaabada amaanka waa in la ilaaliyaa si loo siiyo fursad isku mid ah dhamaan ardayda si ay u muujiyaan guulahooda waxbarasho, iyo inay xaqiijiyaan saxnaanta darajooyinka tijaabada iyo sharafta qiimaynta qaranka. Ku guuldaraysiga in la ilaaliyo tijaabada amaanka waxay khatar galinaysaa degmada iyo shuruudaha isla xisaabtanka qaranka, iyo saxnaanta xogta ardayga, dugsiga, degmada iyo qarankaba. Dhibcaha tijaabada waxa ka mid ah go'aamada muhiimka ah ee ku saabsan mustaqbalka guusha ardayga; waa muhiim inay si sax ah uga turjumaan waxay ardaydu garanayaan awoodna u leeyihiin inay qabtaan. **Hubintani, oo qayb ka ah tababarka tijaabada amaanka, waa in la dhamaystiro ka hor intaanad ka qayb galin nooc kasta oo maamul tijaabo ah**.

Dhamaan nuqulada tijaabada, walxaha tijaabada amaanka, iyo jawaabaha ardayga hadii aan wali la kala xulin iyo haday kama dambays tahayba, waxa loo tix galin doonaa inay yihiin amaan waxaana kaliya loo ogolaan doonaa inuu helo kaliya Shaqaale ama shaqsi dugsi ama degmo. Qof/shaqaale degmo ama iskuul oo oggolaansho la siiyay:

- Waa maamulka degmada iyo iskuulka, macalimiinta, shaqaalaha goobta, ama dadyawga kale ee ay degmadu u qoondaysay ee doorka ku leh kaydinta, faafinta, isku xidhka ama qaadida tijaabooyinka/ ama haysta furayaasha goobaha kaydka ee agabka tijaabada amaanka.
- Waa ka dhamaystay tababar ku haboon oo sanadle ah si ay u gutaan doorka loo xil saaray.

Masuuliyadaha dadka ama shaqaalaha iskuulka iyo degmada ee loo ogolyahay ee laga yaabo inay si buuxda ugu lug lahaadaan nuqulada tijaabada amaanka, jawaabaha ardayda, iyo xogta waxa lagu soo koobay nidaamka buuga tusiyaha ee qiimaynta Minnesota (hada ka dib Tusiyaha nidaamka). Dhamaystirkaaga hubintani, waxaad ku raacday kuwani soo socda:

- Sida la iigaga baahdo doorkayga maamuleed ee barnaamijka tijaabada qaranka oo dhan, waxaan masuul ka ahay xogta la xidhiidha ee ku jirta Buuga tusiyaha nidaamka ee sanadkani iyo tilmaamihiisa maamulida tijaabada. Waan u hogaansami doonaa siyaasadaha io nidaamyada lagu faah-faahiyay ilaha maamulka tijaabada ee qaranka oo dhan.
- Sida la iigaga baahdo doorkayga, waan u tababaranahay ama u tababarnaan doonaa siyaasadaha maamulka iyo nidaamyada tijaabada qarankoo dhan ah ka hor inta aanan ka qayb qaadan qaybna oo ka mid ah maamulka tijaabada qarankoo dhan.
- Sida la iigaga baahdo doorkayga, waxaan tusi doonaa shaqaalaha qaranka iyo degmada nidaamka ilaalinta tijaabada xogta umana ogolaan doono in dad aan loo ogolayn inay qaybiyaan, isku xidhaan ama maamulaan tijaabada ama helaan waxyaabaha ku jira iyo agabka tijaabada amaanka.

- Sidii la iigaga baahdo, waan raaci doonaa nidaamka ku yaal buuga tusiyaha nidaamka si aan u baadho una ogaysiiyo shaqaalaha degmada ama iskuulka ee ku haboon ama waaxda waxbarashada Minnesota si dhakhso ah isla marka aan arko dhaqan xumo badan ama sinaansho la'aanta hadii ay ula kac tahay iyo hadii aanay ahaynba.
- Waan fahansanahay in MDE ay leedahay masuuliyada inay dusha ka eegto maamulko tijaabada qaranka oo dhan ah. waxaan si buuxda ula kaashan doonaa MDE wakiiladooda, saraakiisha dugsiyada markay ku haboon tahay, dhamaan hababka raacida tijaabada amaanka ay ka mid tahay, laakiinse aan ku koobnayn booqashooyinka indho-indhaynta, kormeerka, iyo baadhitaannada.
- Waan fahansanahay in xogta tijaabada iyo nuqulada ka kooban xogta heer arday loo tix galiyo qaar amaan ah oo sir ah, labadaba inta lagu jiro maamulka tijaabada iyo ka dib hordhaca iyo natiijada kama danbaysta ah la helo. Markaad ka shaqaynayso xog arday qeexays iyo tijaabo arday iyo natiijo, labadaba inta lagu guda jiro iyo ka dib maamulka tijaabada, waxaan raaci doonaa dhamaan shuruucda ku haboon ee qaranka iyo kuwa gobolka ee xogta waxbarashada ardayga. Tani waxa ka mid ah xogta ku jirta warbixinaha iyo xogta laga heli karo nidaamka elektarooniga ah ee ay bixisay MDE ama adeeg bixiyayaasheedu.
- Waxaan qirayaa in hadii si fir-fircoon looga qayb qaato niyad jabinta ardayga iyo waalidka/ masuulku ee ka qayb qaadashada tijaabadu ay ka dhalan karto cawaaqib taban oo iskuulkayga ama degmadayda la xidhiidha.
- Waaan fahansanahay masuuliyadayda ah inaan xoojiyo nidaamyo tijaabo oo caadi ah iyo inaan hubiyo amaanka iyo dhawrsanaanta sharafta tijaabada. Waxaan dabaqi oon raaci doonaa nidaamka loo qoondeeyey si loogu ilaaliyo waxa ku jira amaan ahaan iyo inaan hubiyo saxnaanta natiijada tijaabada. Tani waxa ka mid ah, laakiinse aan ku koobnayn in:
  - La aqoonsado xuquuqda ardayda iyo qoysaska ee ah natiijada tijaabada saxda ah ee ka turjumaysa guusha shaqsiga ah ee ardayga iyadoon la caawin.
  - La ilaaliyo dhawrsanaanta qiimaynta qaran iyo xaqiijinta saxnaanta natiijada ardayga iyadoo la ilaalinayo xogta ay tijaabadu ka kooban tahay, ilaalinta agabta tijaabad hab amaan ah, iyo u dhagsanaanta shuruucda cadaymaha.
  - Marna ha ku haynin qalabka imtixaanka aaminka ah ee gacantayda wixii ka baxsan wakhtiyada loo ogol yahay in lagu shaqeeyo, la qaybiyo, la isku duwo, la maamulo, lana soo celiyo, sida ugu habboon kaalinteyda.
  - La hubiyo in aan qaybna oo ka mid ah warqada ama tijaabada online-ka ah loo sharaxay, loo soo koobay, loo macneeyey, lagala naaqishooday, la siiyay, loo qaybiyay shaqsiyaad, aan ogolaansho haysan, la daabacay, la koobiyeeyey, la sawiray, la duubay, ama loola hadhay orojinaal ahaan ama koobi ahaan, iyadoon ogolaansho cad laga haysan MDE ama lagu ogolaan buuga Tusiyaha Nidaamka dhexdiisa.
  - aanan waligay ogolaanayn ama aanan ka qayb qaadanayn adeegsiga aan la ogolayn ee xogta ardayga si loogu galo nidaamka tijaabada ee online-ka ah ama isticmaalka tijaabada online-ka ah.
  - Aanan waliga ka qayb qaadanayn, ama ogolaanayn in cid kale ka qayb qaadato eegista, ka naaqishida, ama faaqidaada waxyaabaha ay xogtu ka kooban tahay  ka hor, inta lagu guda jiro iyo ka dib tijaabadaba ogolaansho la'aan.
  - Aan si fir-fircoon uga ilaaliyo ardayda inta lagu guda jiro maamulka tijaabada dabeecad kasta oo mamnuuc ah.
  - in aanan ka tagin ardayna iyadoon la ilaalinayn inta lagu jiro maamulka tijaabada ama iyadoo uu ilaalinayo shaqaale aan tababar u lahayn ama mutadawaciin.
  - Aanan waligay saamaynayn natiijada tijaabada anigoo siinaya ardayda waxyaalo amaan ah oo imtixaanka ah, u soo jeediyo sida looga jawaabo waxyaalo amaan ah oo imtixaanka ah, ama saamaynaya jawaabaha ardayga waxyaalo amaan ah oo imtixaanka ah. falalka manuuca ah eey ka mid yihiin, laakiin aan ku koobnayn: siinta cadaymo ama qodobo; siinta wax xasuusiya waxyaalaha uu ka kooban yahay ama istaraatiijiyada imtixaanka; ku dhiiri galinta ardaygu in uu saxo ama hubiyo/ dib uhubiyo su'aalo gaar ah; in loo ogolaado inuu helo walxaha silibiska( tusaale, buug daabacan, qoraalo, walxo muraajico ah, goobaha falanqaynta, dhajisyo, garaafyo, jaantusyo, tuse wakhtiyeed, iyo wixii la mid ah.)ama cod badal, tilmaamaha wajiga, tilmaamida, dhagoolaynta, ama gar-garaacista, ama falkale si aad u tusiso jawaabta ama saxnaanta jawaab ardayga.

- Aanan waligay si rasmiya iyo si aan rasmi ahayn toona u samaynayn shay'yo imtixaano amaan ah ama imtixaano shaqsi ah marka laga reebo hadii uu u baahdo tusiyaha iyo tilmaaha khaaska ah. falalka la mamnuucay eey ka mid yihiin laakiin aan ku koobnayn: samaynta fure jawaabeed; dib u eegista ama samaynta walxaha jawaabta/ jawaabaha ardayga ilaa walxaha loo nidaamin in uu sameeyo maamulaha imtixaanka isagoo isticmaalaya tilmaamo ama jawaabo;lahaanshaha, dib u eegista, ama u samaynta ardayga warqad raf ah, walxo warqada su'aalaha imtixaanka; ama la socodka wax qabadka ardayga ee walxaha imtixaanka.
- Aanan waligay badalayn ama ka qayb qaadanayn ku lug lahaansho kale oo mamnuuc ah oo la xidhiidha jawaabaha ardayga.
- Aanan ku caawinayn ama ku dhiiri galinayn cid kale inay ku xad gudubto nidaamka sare ku sharaxan ama aanay ka qayb qaadanayn hab dhaqan kasta oo khatar galin kara amniga imtixaanka ama saxnaanta dhibcaha imtixaanka.

Adigoo aqbalaya qodobada heshiiskan, waxaad u magacawday naftaada inaad tahay shaqaale degmada ah ama qof loo ogolaaday oo ay soo dooratay degmadu. Waxaad sidoo kale xaqiijisay inay degmadu kuu oggolaatay inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedkan si aad u adeegsato una ilaalisid agabka imtixaanka ama xogta ardayga ee la xidhiidha maamulka imtixaanka wadanka oo dhan, ee ay ka mid yihiin aqoonsiga xogta iyo natiijada imtixaanka ardayga, waxaanan halkan idinku raacay inaan u hogaansamo qodobada heshiiskan. Cawaaqibka ka dhasha ku guul daraysiga in loo hogaansami waayo qodobadan, oo ay ka mid tahay laakiin aan ku koobnayn, shuruudaha tababarka dheeraadka ah, khal-khal galinta imtixaanka ardayga, iyo ficilada go'aanka ee degmada dugsiga.

| | |
|---|---|
| ____________________ | ____________________ |
| Saxiixa | Taariikhda |
| ____________________ | ____________________ |
| Magaca (oo daabacan) | Degmada/Dugsiga |